Göteborgs Stad

# Dalbashada caawinaadka

## ee quseeysa adiga naafada ah.



# Adiga degan Göteborg waa in aad noqotaa qof isku filan kana qayb qaata bulshada ayadoo laga duulayo xaalada khaaska kuu ah adiga.

Hadii aad naafo tahay, waxaa laga yaabaa inaad xaq u yeelatid taagero ay ku siiso hay'ada arimaha bulshada ee Cayrta. Dhanbaalkaan waxaad ka heli kartaa xog ku saabsan wadada loo marayo dalbashada taageero iyo in la maro baaritaan lagu ogaanayo baahiyahaaga aad u qabtid in taageero iyo caawinaad dhanka nolol maalmeedka ah lagu siiyo.



## Sharciyada haga shaqada – SoL iyo LSS

Waxaa jira labo sharci oo kala duwan kuwaasoo lagu saleeyo xaq u yeelashada taageero ayadoo ay ku xiran tahay baahiyahaaga – sharciga adeega bulshada (SoL) iyo sharciga taageerada iyo adeega ee dadka naafada ah qaarkood (LSS). Hay'ada aad wax ka dalbanaysid waxay baarayaan baahidaada. Waxayna ka duulayaan adiga iyo taageerada aad u baahantahay si aad nolool isku filaansho ah inta ay suurto gal tahay ugu noolaatid iyo si aad uga qayb ahaato bulshada wada jirkeeda.

**Xog dheeri ah oo sharciyada ku saabsan waxaad ka heli kartaa:**
www.riksdagen.se, kasii dooro dukumentiyada iyo sharciyada: sharciga adeega bulshada (2001:453) shariciga (1993:387) taageerada iyo adeega dadka naafada ah qaarkood quseeya. Sidoo kale waxaad akhrin kartaa caawinaadaha aad dalban kartid halkaan **goteborg.se/funktionsnedsattning**.

## Qofkee xaq u leh taageero?

**Qofkee la sii karaa taagero marka laga eego sharciga adeega bulshada (SoL)?**
Qof kasta ayaa xaq u leh inuu dalbado caawin ayadoo la tix raacayo sharciga adeega bulshada (Sol). Si aad xaq ugu yeelatid caawin waxaa shardi ah inaa naafo tahay, taasoo ku ah caqabad nolool maalmeed kaaga, adiguna aadan shaqsiyan ama si kale u xalin karin. Sharciga adeeg bulshadu ma xadaynayo nooca caawin ee aad dalban kartid ee taas badalkeeda adiga ayaa sheeganaya nooca caawineed ee aad u baahan tahay.

**Qofkee la sii karaa taageero marka laga eego sharciga taageerada iyo adeeg siinta dadka naafada ah qaarkood (LSS)?**
Dadka oo dhan ayaa xaq u leh iney codsadaan taageero marka laga eego sharciga taageerada iyo adeeg siinta dadka naafada qoorkood (LSS). Si aad xaq ugu yeelatid caawin waxaa shardi ah in aad haysatid noocyada naafanimo mid ka mid ah, taasoo ugu yaraan soo galaysa mid ka mid ah sharciga sedexdiisa qaybood - ee loogu yeero qaybaha dadka.

**Adigu waxaad ka tirsan tahay dadka sharcigu qeexey, hadii**

**1.** Lagaa heley in dhimirkaagu dhiman yahay, autism ama marxalad u dhiganta autism.

**2.** Si weyn ama abadiyan ah uga naafowdo dhimirka kadib dhaawac maskaxda kaasoo gaarey intaa qaan gaartey kadib (intaa buuxisey 16 sano kadib) taasoo ay sababtey jug kugu dhacdey ama cudur jirka kaaga dhacay.

**3.** Si abadiyan ah jirka ama dhimirka naafo uga tahay, taasoo aysan sababin gabow isla markaasna aad u qabtid baahi weyn taageero ama adeeg si aad nolool maalmeedkaaga u wadatid.

Si loo baaro inaad ka tirsan tahay dadkaas cayiman waxay hay'ada arimaha bulshada ee Cayrta mararka qaar u baahan kartaa cadeyn ka timid caafimaadka taasoo sharaxaysa waxa lagaa heley iyo baahidaada.

# Laga bilaabo codsi ilaa go'aan

### Codsashada taageerada ee laga dalbado hay'ada Cayrta

Waxaad ku codsan kartaa taageerada teleefoon, e-mayl , xafiiska oo aad bookhatid, waraaq ahaan ama adeega interneydka ee boga goteborg.se/funktionsnedsattning. Codsiga waxaad ku sharaxaysaa waxaad rabtid in lagaa caawiyo. Waalidka, qaraabada, qofka masuul kaa ah ama maamulaha arimahaagaa ayaa sidoo kale codsiga kuu samayn kara. Si aad u heshid xogta e-maylka, ciwaanka boostada iyo goobta lagu bookhan karo xarunta naafada laga caawiyo ee aad ka tirsan tahay, bookho goteborg.se oo ka sii dooro "Raadi qaybta naafada".

### Kulan xoghayaha hay'ada Cayrta

Marka hay'ada Cayrtu qaabisho codsigaaga ama dalabkaaga ayaa waxaa teleefoon, e-mayl ama waraaq kaala soo xiriiraya xoghaye hay'ada Cayrta ka socda si loo qorsheeyo kulan. Inta kulanku socdo waxaa adiga iyo xoghaya Cayrtu ka wada hadlaysaan baahiyahaaga, kadibna xoghaya cayrtu wuxuu bilaabayaa baaritaan.

### Baaritaan

Marka aad dalbatid taageero, hay'ada Cayrtu waxay bilaabaysaa baahiyahaaga iney baaritaan ku samayso. Baaritaanka waxaa lagu salaynayaa warbixinta xoghaya Cayrtu kaa heley. Mararka qaarkood waxaa dad kale looga baahan karaa xog dheeri ah. Ayadoo xoghaya cayrtu wato ogolaanshahaaga ayuu marxaladaha qaarkood ka dalban karaa caydeyn dhaktar ama xog u dhiganta hay'adaha kale ee aad xiriirka la leedahay sida hay'ada Caymiska ama hay'ada shaqada.

### Xogta go'aanka lagu saleeyey

Adigu waxaad markkasta xaq u leedahay inaad heshid xogta lagu go'aan qaatey.

### Go'aan

Xogta uu helo xoghaya hay'ada arimaha bulshada ee Cayrta inta baaritaanku socdo ayaa waxaa ka dhalanaya qaymayn iyo go'aan.

Labo go'aan oo kala duwan baa jira:

**1. Ogolaansho**
**2. Diidmo**

**Go'aan ogolaansho ah** wuxuu ka dhigan yahay in adigu laguu ogolaado caawintii aad dalbatey. Hay'ada adeeg bulshada ee Cayrta waxay shaqo galinaysaa cidii adeeg lagugu caawinayo fulin lahayd.

**Diidmo** macnaheedu waxa weeye in aan laguu ogolaan caawinaadii aad dalbatey. Adigu markaas xaq baad u leedahay inaad ka dacwooto go'aanka. Xogta sida aad uga dacwoonaysid waxaa lagu soo raacinayaa go'aanka.

Waxaa dhici karta in hay'ada addeg bulshada ee C ayrta qayb ahaan ogolaato codsigaaga. Taasi macneheed waxa weeye in aad hesho qayb ka mid ah cawinaadihii aad dalbatey, laakiin aadan kuli laguu wada ogolaan. Adigu markaas waxaad xaq u leedahay inaad ka dacwooto go'aanka hadii aadan ku qancin. Xogta sida aad uga dacwoonaysid waxaa lagu soo raacinayaa go'aanka.

Hay'ada adeeg bulshada ee Cayrta waxay go'aanka iyo baaritaanka kuugu soo direysaa boosto ahaan hadii aadan codsan in si kale laguugu soo gudbiyo. Go'aanka ayey ku cadaan doontaa mudada go'aanku jirayo.

Markasta waxaad xaq u leedahay in aad la kulanto dadka kiiskaaga go'aanka ka gaarey.



### Imisa waqti le'eg ayey qaadan kartaa in go'aan la iga gaaro

Labada sharci ee SoL iyo LSS waxay qabaan in hay'ada Cayrtu baaritaankeedu ku dhaco si dhakhso ah, taasoo macneheedu noqon karo in kiisasku qaadan karaan xiliyo kala duwan.

Hadii hay'ada arimaha bulshada ee Cayrta si dhakhso ah u hesho xogta ay u baahan tahay waxaa dhici karta in hanaanka shaqadu dhakhso u dhaco. Hadii ay waqti qaadato helitaanka xogta waxaa dhici karta hanaanka shaqaduna iney dheeraato.

### Caawin

Hadii laguu ogolaado codsigaagii caawinta waxaa xog-haya- cayrtu u dirayaa shaqada kan fulinaya adeega laguu qabanayo. Qofka ama kuwa kuu qaban doona adeega ayaa markaa kadib kuula soo xiriiraya qaabkii adiga iyo xogahaya Cayrtu aad ku heshiiseen. Xiliyo kala duwan ayey qaadan kartaa inta aad caawinaad ka heleysid ayadoo ku xirnaan doonta fursada loo haysto in la fuliyo caawinaada.

### Dib u eegis

Hay'ada arimaha bulshada ee Cayrta waxaa masuul ka saaran yahay in dib u eegis ku samayso cawinaada lagu siiyey. Taasmacneheed waxa weeye in xoghaya Cayrta ugu yaraan hal mar sanadkii kula soo xiriirayo suu wax uga ogaado in taageeradii lagu siiyey si fiican kuugu shaqaynayso, hadii caawintu wali tahay mid haboon ama hadii baahi yahaagu isbadeleen.

### Ka dacwoonaya go'aan

Hadii aan laguu ogolaan taageeradii aad dalbatey, waad ka dacwoon kartaa go'aanka. Xogta sida aad uga dacwooneysid waxaa laguu soo raacinayaa go'aanka. Hadii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo dacwada, waxaad la xiriiri kartaa xoghayahaaga Cayrta.



# La xiriir hay'ada adeega bulshada ee Cayrta

### Teleefoon

Si aad ula xiriirtid xarunta laga maamulo taageerada naafada waxaad wacaysaa magaalada Göteborg xarunteeda xiriirka u qaabilsan. Ayaga ayaa kugu caawinaya sida aad ula xiriiraysid xarunta kuugu dhow ee naafada laga taageero. Magaalada Göteborg xarunteeda xiriirka, teleefoonkeeda: 031–365 00 00.

### Khadka laga dalbanayo ayadoo la adeegsanayo interneydka

Waxaad dhiiban kartaa codsi adigoo adeegsanaya magaalada Göteborg bogeeda interneydka. Lifaaqaan ayaa foomka codsiga ka heleysaaå **goteborg.se/funktionsnedsattning** ama goteborg.se ciwaan hoosaadka "adeega interneydka iyo foomanka"

### Bookho xaruntaada qaabilsan taagerada naafada.

Waxaad ka heleysaa ciwaanka xaruntaada kugu dhow ee taageerada naafada halkaan **goteborg.se/funktionsnedsattning**.

### Hagida caruurta iyo dad waaweyn teleefoon 031-367 98 08

Haguhu wuxuu bixinayaa xog iyo hagid ku saabsan nooca taageero ee bulshada ugu talo gashay shaqsiyaadka naafada ah.

### Arimaha degdega ah teleefoon 031-365 87 00

Waxaad marka kowaad la xiriiri kartaa xarunta taageerada naafada ee xaafadaada.Xarunta taageerada naafada xiliyada lasoo wici karo maalmaha shaqada waa 8.00-16.00. Hadii aad u baahatid caawin fiidkii, habeynkii iyo maalmaha aan la shaqayn waxaad la xiriiri kartaa qaybta arimaha degdega ah qaabilsan.

### Taageerada qaraabada

Talo bixiyaha qaraabada wuxuu u shaqeeyaa sidii taageero inuu u noqdo adiga oo ah qaraabada qof naafada ah. Xogta xiriirka ee talo bixiyaha qaraabada ee kuugu dhow waxaa ka heleysaa **goteborg.se**.

### Talo bixin

Waxaad fikirkaaga ku aadan magaalada Göteborg xarumaheeda iyo adeegooda ka dhiiban kartaa halkaan **goteborg.se**.

Göteborgs Stad 211119-001-161 Somaliska Tryck: Exakta Mars 2022